SOMALI VOICE OF NEW ERA, PROGRAM NO1075
WARQADDII II EE RASUUL BUTROS
3:11-HORDHACA KITAABKA NEBI COBADYAAH

Halkani waa raadiyo Transworld oo idinku soo dhowaynaya barnaamij tafsiir ah oo soconaya muddo nusa-saac ah. Waxaana barnaamijkan Codka Waayaha Cusub ee waxbaridda ah idiin soo diyaariya Masiixiyiin Soomaali ah, waxaana laga maqlaa barnaamijkan habeenka Isniinta ilaa iyo habeenka jimcaha, saacaddu markay tahay 7:25ka fiidnimo, mawjadda 31ka miterband.

OPENING SINGNATURE TUNE UP 25 SEC. AND UNDER.

Mar kale ayaannu dhegaysatayaal idinku soo dhowaynayaa barnaamijka, waxaannu horey idiinku sii wadaynaa daraasaadka aynu ka soo xiganayno kitaabka qoduuska ah ee aynu ugu magac-darnay, **"Dhex-marka Kitaabka Qoduuska ah."**

Waa barnaamij aad ku baranaysaan kutubta Babaylku uu ka kooban yahay, haddii ay ahaan lahaayeen kuwii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub.Waxaannu horey idiinku sii wadaynaa dhegaystayaal casharradii aynu ka soo xiganaynay Warqaddii labaad ee rasuul Butros cutubka 3aad. Cutubkan saddexaad wuxuu rasuulku uga hadlayaa saddex arrimood oo kala ah:

(1) Sida dunidu ay noqon doonto dabiicad ahaan wakhti ka hor intaanu Masiixu dunida ku soo laaban. (2) Qorshaha Ilaah u hayo dunidan, waxaana loo kala saarayaa maaddadaas saddex mawduuc. Waxaana weeye duniyooyinkii hore, duniyooyinkii hore, kuwa maanta, iyo kuwa imanaya mustaqbalka. (3) Waxaa ugu dambeeya canaanashada uu anaananayo rumaystayaasha masiixa, oo wuxuu siinayaa caqli

celin, talo iyo weliba tusmooyin aasaas u ah rumaysadka Masiixa, isla sidii rasuulladii kaleba ay inoo siiyeen. Waxaana hadalladiisa loo qaadanaya, "Canaan waayeel." Waxaanan kaga gudbi doonnaa warqaddan labaad, oo gebagebo maraysa, kitaabkii Cobadyaah oo ka mid ahaa nebiyadii Axdigii Hore.

SONG:REEL----CUT-----

Markii noogu dambaysay dhegaystayaal waxay inoo joogtay xukunka dunida ku soo fool leh, iyo in samda iyo dhulkaba la laalaabi doono. Laakiin loo laalaabi maayo sida ay idinka idinla tahay, laakiin waxaa loo laalaabayaa nidaam cilmi ku dhisan. Waxaana rasuul Butros oo ka hadlaya sida Ilaah dunida u laalaabayo uu leeyahay:

"Laakiinse maalinta Rabbigu waxay u iman doontaa sida tuug oo kale; maalintaas oo ay samooyinku baabi'i doonaan iyagoo sanqadh weynu ka yeedhayso, oo waxyaalaha buuranna iyagoo gubanaya ayay baabi'i doonaan. Dhulka iyo shuqullada ku jirana waa la gubi doonaa."

Haddaba kaddib markii dunida xukun la saaro, taasoo rasuul Butros inoo sharrixi doono, ayaa waxaa la abuurayaa samo cusub. Waxaannu haddaba meeriska cutubkan 3aad idiinka bilaabaynaa aayadda 11aad, waxaana qorniinka qoduuska ahi leeyahay sidatan:

"Haddii waxyaalahan oo dhammu ay sidaas u baabi'i doonaan, haddaba dad caynkee ah baa idinku waajib ah inaad noqotaan si aad ugu dhaqantaan dabiicad qoduus ah iyo cibaado."

Waxaa Butros ku leeyahay masiixyiinta, marka la eego wixii horey u dhacay iyo waxa dhici doona

mustqbalka, maahan inaynu meel is-xabakinno, ama carruur sii ahaanno, ama muranno. Waa in loo hawl galo sidii Masiixa loo raaci lahaa, oo kuweennma Masiixa raacayna aynu ku dadaalno sidii erayga Injiilka loola qaybsan lahaa walaalaha aan weli maqal.

Haddaba bal aan su'aal ku weyddiiye, maxaad samaynaysaa maanta si aad gacan- uga geysato baafinta qawlka Ilaah. Waa arrin waajib ku ah wehelnimo waliba, masiixi waliba iyo wadaad waliba. Waa in mid waliba ee hadalka rumaystay uu ka fakaro sidii uu hadallada Ilaah ku baafin lahaa. Qof waliba oo masiixi ah xil baa ka saaran baafinta Hadallada Ilaah, maxaa haddaba adigu ka samaynaysaa waxyaalihii aad maqashay.

Rasuul, Butros wuxuu leeyahay, **"Haddaba dad caynkee ah baa idnku waajib ah inad noqotaan si aad ugu dhaqantaan dabiicad qoduus ah iyo cibaado?"** Weli waxaannu horey idiinku sii wadaynaa meeriska cutubka 3aad, waxaanan idiin akhrinayaa aayadda 12aad, waxaana qorniinka qoduuska ah leeyahay sidatan soo socota:

"Idinkoo sugaya oo aad ugu dadaalaya imaatinka maalinta Ilaah, taasoo samooyinku iyagoo ololaya ay baabi'i doonaan, waxyaalaha abuuranna iyagoo gubanaya ayay dhalaali doonaan."

Waxaa rasuulku leeyahay: **"Idinkoo sugaya oo aad ugu dadaalaya imaatinka maalinta Ilaah."** Rasuul Butroswuxuu la hadlayaa Yuhuuddii dibadda ku kala yaacsanayd, oo wuxuu leeyahay maalinta Rabbigu way soo dhowdahay." Marka samooyinku iyagoo ololaya ay baabi'i doonaan, oo waxyaalha abuuranna iyagoo

gubanaya ay dhalaalin doonaan. Haddaba marka somooyinka la duuduubo, ayaa maalinta Rabbiga imanaysaa, taasoo joogto ah, sida aynu ku arki doonno kitaabka Muujintii 21:1. Haddaba wuxuu rasuulku leeyahay, sida ku qoran aayadda 12aad: **"....taasoo samooyinka iyagoo ololayaay baabi'i doonaan, oo waxyaalaha abuurannma iyaguu gubanaya ayay dhalaali doonaan."**

Waa wax la yaab leh in waxyaabahan cilmiga ku fadhiya uu ku hadlo nin ka kaluumaysan jiray baddba Galalii. Ilama aha in xitaa Butros garanayey sida biyaha faraha badan ee baddii uu ka kalluumaysanayey ay u baabi'i doonaan ama u guban doonaan. Ha yeeshee waxalda loo yaqaanno atomska, oo ah waxyaalaha dunida lagu dhisay ayaa wax waliba dhalaaliya. Wuxuuna Butros u isticmaalayaa erayga dhalaalis hannaan kale.

Waana eray ka duwan kii uu dhalaalista u isticmaalay sida ku qoran aayaddii tobnaad. Waxaa imminka uu isticmaalayaa tekomai, waana eray macne ahaan ka dhigan, **"Beytamaalka dabiicadda,"** ama waxaa loola jeedaa in wax waliba ay lumayaan, ama ay noqonayaa ciid. Wax waliba way soo idlaanayaan ama dhammaanayaan.

Waxaa cilmiyan lagu sifayn karaa macnaha erayga marka la tuuro atomic bomka in shucaaca wax baabixiya ee loo yaqaanno radioactive. Kaasoo ku woconaya molecule waliba ama mariinnada hirarka hawada. Haddaan intaan uga baxno duniyooyinka maanta, ayaanu markaa horey idiinku sii wadaynaa mawduucyada uu cutubkani ka kooban yahay waxaanan imminka isla eegaynaa:

DUNIYOOYINKA MUSTAQBALKA

Wuxuu haatan rasuul Butros ka hadlayaa waxyaabaha iman doona ama ina hor yaal--waana dunida imanaysa. Markaa maahan in dundan la baab'iyo kama dhigna in Ilaah go'aan ku gaarayo intuu intaas uga haro dunidii iyo dadkii. Inkastoo dunida horey loo ciqaabay, oo ciqaab kalena ay sugayso, haddana Ilaah wuxuu abuurayaa duni cusub.

Rasuul Butros, oo Ruuxa Qoduuska ahi ka dul hadlayo, ayaa wuxuu leeyahay sida ku qoran Warqaddiisii labaad 3:13, baalka 414 ee Axdiga Cusub, Waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

"Laakiinse sidii uu inoo ballan qaaday, waxaynu sugaynaa samooyin cusub iyo dhul cusub oo xaqnimo dhex deggan tahay."

Dunideenna maahan mid xaqnimo laga helo. Waxaan xaqnimo lagu arkaynin golayaasha siyaasadda, maxkamadaha, iyo weliba goobaha wax lagu barto.Meel waliba waxaa ka jirta caddaaladdarro iyo eex. Ha yeeshee waxaa xaqnimadu dhex degganaan doontaa samada iyo dhulka cusub ee Ilaah samayn doono. Nin heesaa ah ayaa wuxuu yiri, Nayruusku waa Ciid waa negi adduunyadu.

Haddaba dunidu negi maahan. Mid kalena wuxuu yiri gabar yahay adduunyadu waa geed walhanaya oo jirrid lagama gaaro, wuxuu ku soo gunaanadayaa ama ku soo hoorinayaa heeska, **"iyadays guraysa."** Markaa dunidu negi maahan, weliba wax waliba sidii loogu tala-galay uma socdaan. Waxaa deegaan waliba ee dalkayaga ah ka jira cadaaladdaro. Waxaa dagaalka keenay in la helo xukun kii hore ka wanaagsan oo ka

caddaalad roon, laakiin waxaa soo baxday in markii deegaan waliba kuwii u dhashay ay xukunka la wareegeen ay korortay caddaaladdarradii. Waxaana soo baxay dabaqado kala fog. Dad yar oo ka mid ah dadkii deegaana ayaa waxay heleen maal aad iyo aad u fara-badan. Ha yeeshee dadka intiisii badnayd, **"waaba looga sii daray."** Waxay taagan yihiin, yaa mar sidii beri ay ahaan jirtay ka dhiga xaaladda. Waxaa taas ugu wacan in dunidan ayan xaqnimo ka jirin ama aan laga sugaynin.

Ilaahna dunidii hore ayuu cusboonaysiinayaa isla sida ragga warshadaha leh ay gawaaridii hore u beddelaan, oo gawaari cusub u soo saaraan oo kale. Waxaa laga yaabaa in xoogga gawaaridii hore uu ahaa ilaa iyo 24 quwadda faraska ah. Markaasaa waxaa laga dhigayaa in ka badan 240 quwadda faraska ah. Markaa tankeedii, tamarteedii, iyo taagteedii, iyo xawaarihiiba wuu is-beddelayaa. Ilaahan sidaasoo kale ayuu dunida ka dhigi doonaa.

Wuxuuna noqon doonaa dhul wacan oo dadku ay xaqnimo ebyayaan. Waxaanan garanayaa in sida nebi Daa'uudba uu sii waxyiyey, in dunidanu ay noqon doonto mid aan la mid ahayn sida ay maanta tahay. Waxaa Sabuurluhu leeyahay:

"Waayo, isagu wuxuu u imanayaa inuu dhulka xukumo, Wuxuu dunida ku xukumi doonaa xaqnimo. Dadyowgana caddaalad."

Wuxuuna dhulku noqonayaa meel xaqnimadu ku badan tahay oo wax badan ka beddelan dunideenna. Haddaan intaas uga gudubno maaddada ku taxluuqda samooyinka cusub iyo dhulka cusub ee Ilaah uumi doono, ayaannu imminkana eegaynaa maaddada ugu dambaysa ee

cutubkan 3aad, waxaana weeye maaddada khusaysa;

CANAAN WAAYEEL OO LOO SOO JEEDINAYO MUUMINIINTA MASIIXIYIINTA AH

Si bal aynu arrinkaas isaga ah wax uga ogaanno ayaannu dhegaystayaal haatan idiin akhriyeynaa Warqaddan labaad ee rasuul Butros 3:14, waxaana qorniinka qoduuska ahi leeyahay sidatan:

"Sidaas daraaddeed, gacaliyayaalow, idinkoo waxyaalahaas sugaya, ku dadaala in laydin helo idinkoo nabadoon oo aan wasakh iyo eed lahayn Ilaah hortiisa."

Waxaa haddaba rasuulku leeyahay, **"Sidaas daraaddeed, gacaliyayaalow, idinkoo wayxaalahaas sugaya."** Waxaa taasu ka macne tahay, maaddaama aynu garanayno in dunida iyo shuqulladeeda oo dhan ay guban doonaan, inaynu garanno ahmiyadda ay leedahay nolosha cibaadada leh inta aynu dunidan ku nool nahay. Waa inaannu, intaan dunida joogno ku noolaanno nolol masiixinnimo, waana nolol Ilaah laysku soocayo.

Saaxiib, maxaa dunidu qiimi leedahay maanta? Waa maxayse yoolashaada? Ma waxaad tahay qof masiixi ah oo hirgalinaya yoolal wax ku ool ah? Dadka qaarkii ayaa yoolasha nolosha u qaata sida inay qoys wacan yeeshaan oo ka taxaddaraan. Taasina waa wax wanaagsan saaxiib. Qofna wuxuu ku dadaalaa sidii ilmihiisa uu wax ku bari lahaa. Taasina waa yool aad u wanaagsan. Inkastoo haddaba yoolashaas oo dhan ay ahmiyad sare leeyihiin, haddaba ma is-weyddiisay meesha noloshaadu ku hiranayso? Ma waxaad ku hiranaysaa inaad Ilaah u noolaato?

Haddii aad Ilaah u noolaato, wax kasta ee kale way

iska hagaagayaan, sida inaad qoyskaaga ama reerkaaga aad wax u qabato, iyo inaad ilmahaaga jaamicado geysato. Wax waliba way hagaagayaan, oo waxba kaa hallaabi maayaan. Waxaan imminka ku soo dhowaanaynaa gebagebada warqaddan labaad ee rasuul Butros iyo weliba cutubkan saddexaad, waxaanan la soo kala baxaynaa baalka 414 ee Axdiga Cusub 3:15. Wxaana qoran sidatan:

"Sidii walaalkeen gacaliye Bawlos idiin ku soo qoray xigmaddii la siiyey, ku tiriya in dulqaadashada Rabbigeennu tahay badbaado."

Rasuul Butros wuxuu adkaynayaa dulqaadashada oo wuxuu leeyahay, **"...ku tiriya in dulqaadashada Rabbigeennu tahay badbaado."** Waxaana taasu ka macne tahay, haddii ay kula noqoto in Masiixu uusan berri imanaynin, waxaa taas uu u yeelay adiga awgaa, waa adiga dhegaystaha ah ee aan weli rumaysanin Injiilka Masiixa, oo wuxuu ku siinayaa fursad ah inaad rumaysato adiga iyo inta kale ee aan weli Masiixa rumaysan.

Dul-qaadashada aynu dul-qaadaynayno ayaa fursad inoo siinaysa kuweenna badbaaday inaan u kuurgalno xiisadaha dunideenna maanta. Maahan inaynu ku bardadno waxyaabaha dhacaya iyo isbeddelka soconaya. Ilaah wuxuu joogaa samada sare. Wax waliba kuma qumana dunida, laakiin wax waliba isaga ayaa habaynaya. Taasina waa farriinka kitaabka Axdiga Cusub, oo rasuul Butros wuxuu ina xusuusinayaa in rasuul Bawlos uu arrinkaas inagala hadlay. Waana inaan, inta la dhowrayo Masiixa, la shaqo la'aan. Haddaan horey idiinku sii wado meeriska cutubka 3aad ayaannu imminkaa la soo kala baxaynaa aayadda 16aad.

waxaana qoran sidatan:

"Siduu warqadihiisii oo dhan waxyaalahan ugaga hadlay. Kuwaas waxaa ku jira wax in la gartaa ay dhib badan tahay, oo jaahiliinta iyo kuwaan adkayn ayaa qalloociya, siday Qorniinka kaleba u qalloociyaan oo ay u halligmaan."

Butros wuxuu leeyahay, wixii rasuul Bawlos qoray waxay qayb ka yihiin Qroniinka. Wuxuu kaloo leeyahay Bawlos wuxuu soo saaray run baaxad dheer. Oo weliba Bawlos keliya maahane, Butrosna wuxuu halkan inoogu muujinayaa run aad iyo aad u qoto dheer, oo rasuulkuna wuxuu muujinayaa waxyaabo qarsoonaa markii ay joogto duniyooyinkoo kore, kuwa maanta iyo kuwa imanaya mustaqbalka soo socda. Weli waxaannu ku irnaa dhammaadka warqaddan labaad iyo weliba cutubkan saddexaad, waxaanan la soo kala baxaynaa baalka 414 ee Axdiga Cusub 3:17. Waxaana qoran sidatan:

"Sidaas daraaddeed, gacaliyayaalow, idinkoo waxyaalahan hore u garanayay, isjira, yaan laydinku kaxaysan qaladka kuwa sharka ah oo aydnaan ka dhicin adkaantiinna."

Waxaa halkan ku qoran sheey ay tahay inaan garanno saaxiib. Haddaba saaxiib ha noqonin nin Masiixi ah oo caajis ah ee ka gaabiya inuu dhug u yeesho Hadallada Ilaah. Waa inaad si wanaagsan u barataa kitaabka, adigoo hadba meel aan wax ka indha-indhaynaynin, laakiin xoogga saaraya Hadallada Ilaah. Maahan in wakhti gaaban oo keliya la raacdo hadallada qirada weyn leh ee Ilaah. Aqoonta baaxadda weyn leh ee aynu Hadallada Ilaah kala soo baxayno wa ain laga arkaa noloshayada oo

ay saamayn weyn ku yeelato nafsaddeenna. Waxaana lagaa doonayaa inaad noqoto Masiixi ad-adag oo aan waxyaalaha aan macnada lahayn u dhicin. Sidaannu idiin bidhaaminnay bilowgii warqaddan, ayaa rasuul Butros doonayaa inaannu aqoonno Masiixa. Waxaana hadalka warqaddan oo dhan lagu soo koobay aayadda ugu dambaysa ee ah aayadda 18aad ee cutubkan 3aad. Waxaana rasuul Butros leeyahay sidatan soo socota: **"Laakiinse ku kora nimcada iyo aqoonta Rabbigeenna ah Badbaadiyeheenna Ciise Masiix. Isaga ammaanu ha u ahaato haatan iyo weligeedba. Aamiin."**
Wuxuu rasuulku leeyahay: Ku kora nimcada iyo aqoonta Sayid Ciise Masiix. Haddaba aqoonta rasmiga ah maahan xeer iyo qaacidada walxaha, ama qarsoodi sida firqooyinka bidcada ah ay dadka baraan ama ku doodaan. Hal mid baa ahmiyaddu tahay, waxaana laynoogu sheegay kolkii hore Injiilka sida Yooxanaa u qoray 17:3, markaasoo Sayid Ciise Masiix lahaa: **"Tanu waa nolosha weligeed ah inay ku gartaan, adoo ah Ilaaha runta ah oo keliya, iyo inay gartaan Ciise Masiix, kii aad soo dirtay."** Rasuul Butrosna wuxuu leeyahay, **"Laakiinse ku kora nimcada iyo aqoonta Rabbigeenna ah Bdbaadiyeheenna Ciise Masiix. Isaga ammaanu ha u ahaato haatan iyo weligeedba, Aamiin."**
Rasuul Butros wuxuusan illoobaynin sidii Sayid Ciise Masiix ugu wanaagsanaaday, isagoo ahaa nin aan cilmi lahayn oo weliba kalluumaysato ah. Markii dambe rasuul Butros wuxuu noqday nin aad iyo aad muddiic ugu ah Sayidka oo rumaysan inuu Sayidkiisa yahay, wuxuuna u jeclaaday sida badbaadiyihiinsa, oo wuxuu u jeclaa sida inuu yahay qofka ugu dhow ama ugu sokeeya ee uu leeyahay.

Welibana wuxuu ka cibaadaystay Masiixa isagoo garanaya in Masiixu ahaa Wiilkii Ilaah, iyo weliba Masiixii Ilaah. Rasuul Butros wuxuu ku soo gunaanadayaa warqaddiisan sidatan: **"Isaga ammaanu ha u ahaato haatan iyo weligeeba Aamiin."** Welibana aniga iyo adigaba way inoo wanaagsan tahay inaan Masiixa jeclaanno.

Markii aynu barashadiisa wakhti u hurno, sida laga muujinayo Hadalladiia, ayaannu ku koraynaa garashada aynu isaga garanayno. Waxaana Rasuul Butros leeyahay, **"Laakiinse ku kora nimcada iyo aqoonta Rabbigeenna ah Badbaadiyeheenna Ciise Masiix. Isaga ammaanu ha u ahaato haatan iyo weligeedba Aamiin."**

MUSIC

Waxaannu dhegaystayaal intaas ku soo ekaynaynaa cutubkii 3aad iyo weliba warqaddan labaad ee rasuul Butros. Waxaanan quuddarraynaynaa inaad ka bogateen, oo waxyaabo fara badani idiinka kordheen aqoontan baaxadda weyn leh ee ku qoran kitaabka Qoduuska ah ee Baybalka Guud ahaan, gaar ahaan warqaddan labaad ee rasuul Butros. Waxaad garateen in duniyooyinkii hore la ciqaabay.

Waxaad kaloo garateen in duniyooyinka maantana ay xukun hoos joogaan, waxaa kaloo aad fahamteen in xukun khatar ah uu ku soo fool leeyahay dunida, iyo in samada iyo dhulkaba la soo duuduudin doono, oo beddelkoodiina la abuuri doono duni cusub. Waxaana rasuulka oo taas ka hadlayaa leeyahay, sida ku qoran 3:13, oo leh:

"Laakiinse siduu inoo ballanqaaday, waxaynu sugaynaa samooyin cusub iyo dhul cusub oo xaqnimo

dhex deggan tahay."

Waxaannu haddaba filaynaa inaad ka hesheen qushuuc iyo waxbaris warqaddan labaad. Waxaanan imminka so gaarnay:

HORUDHACA KITAABKA NEBI COBADYAAH.

Waxaannu haddaba ku bilaabaynaa dhegaystayaal horu-dhacan ciddii qortay kitaabkan Cobadyaah. Cobadyaah waxaa uu ka macne yahay addoonkii Yahweh. Wuxuuna kaloo ka mid yahay afarta nebi ee aynaan waxba ka garanaynin taariikhdoodii hore oo welibana qoray waxyi. Saddexda kale ee nebi waxaa ka mid ah Xabakuuk, Xaaggay, iyo Malaaki.

Afartan nebi waxba laga garan maayo. Cobadyaah wuxuu baalasha kitaabka qoduuska ah u soo gelayaa sida reer aakhiraad. Kitaabka wuu ku qoran yahay, laakiin haddana waxba ka garan mayno. Wuxuuse u qalmaa magaca loo bixiyey oo ahaa addoonkii Yahweh, waayo bil-xaqiiqa wuxuu ahaa addoonkii Yahweh. Addoonku kuma faano abtir, waxna kuma raadiyo mana la aha in munaaficaad ku jiro abtir.

Cobadyaah wuxuu ahaa nebiga qoray mid ka mid ah waxyiyada ugu waaweyn ee qorniinka. Ditoor Pusey oo ka hadlaya nebiya ayaa wuxuu leeyahay, **"Ilaah wuxuu ballan-qaaday in magaciisa oo keliya uu sarreeyo. iyo in waxyigan kooban laga ogaado dunida."** Codadyaah waa kitaab gaaban, laakiin lagu tilmaami karo mid sida bobaane weyn. Waa wax yar, habase yeeshee haddana waxaa ku qoran farriimo xoog badan. Haddaan intaas ku soo ekayno faallada ku saabsan ciddii qortay, ayaannu imminkana isla indha-indhaynaynaa:

SONG: REEL----CUT-------

Halkani waa TWR, Idaacadda TWR oo idinku leh Ilaah haydin barakeeyo oo haydinku anfoco wixii aad caaway ka maqasheen barnaamijka. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan habeen dambe (hadahan oo kale) isla mowjaddan 25ka miterban. Haddiise aad doonaysaan inaad fikirkiinna ka dhiibateen wixii aad caaway maqasheen ayaad nagala soo xiriiri kartaan somtwr@twr.co.ke.

Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan: P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Waxaa kaloo aan idin siin doonaa website aad ka maqashaan barnaamijyadeenna Soomaaliga ah, si kuwiinna doonaya inay koorasyo ka qaataan Baybalka ay ugu hirgasho.

SIGNATURE TUNE UP 6 AND UNDER

Halkani waa TWR oo idiin rajaynaya Habeen Baraare iyo barwaaqaba leh. Inta aynu ka gaari doonno wakhti aynu ku kulanno Barnaamij la mid ah kan caaway aad maqasheen, waxaan idinku leenahay nabadda Ciise Masiix, ha idiinku badato xagga jidhka iyo ruuxaba Aamiin